

# Xiriir Badbaado leh

## Qodobbada Muhiimka ah

- Xiriir badbaado leh waa xiriir la isku qalbi furan yahay oo badbaado leh.
- Oggolaanshuu waa heshiiska in wax la sameeyo.
- U sheeg qof aad ku kalsoon tahay iyo booliska haddii uu qof rabshad kugu wado ama ku cabsi gelinayo.

### Waa maxay xiriir badbaado leh?

Xiriirkha badbaadada leh waa xiriir la isku qalbi furan yahay oo badbaado leh. Waa ka xor xadgudubka gacan ka hadalka iyo dhimirka. Xiriirkha aan badbaadada lahayn, qof ayaa ku cabsi galiya kuguna qasbo inaad wax samayso.

### Oggolaansho

Oggolaanshuu waa heshiiska ah in wax la sameeyo. Waa inaadan dareemin in lagugu cadaadinayo inaad bixiso ogolaansho. Goortaat doonto ayaad la noqon kartaa ogolaanshaha. Badbaado ma leh haddii qof kugu qasbo inaad wax sameyso markii Aad tiri "Maya" kadib ama aad kari weyday inaad tiraahdo "Maya" Qaar ka mid ah falalka aan badbaadada la hayn waa galmo qasab ah iyo taabasho ama dhunkasho aan la rabin.

### Badbaadada Jirka iyo Dhimirka

Jir ahaan waad badbaadsantahay marka aadan ka baqayn in taabasho noqon doonto mid rabshad ah ama aan la rabin. Laga yaabaa inaad jir ahaan u badbaadsanayn haddii qofku ku garaacayo, ku dharbaaxayo, ku feerayo, ku laadayo, jiidayo timahaaga, ku riixayo, ku qaniinayo, ama hub kuu adeegsanayo.

Dhimirkaagu way badbaadsanyahay marka aad xor ka tahay xadgudubka hadaleed ama shucuureed. Xadgudubku wuxuu noqon karaa marka qofku dhaho ama sameeyo wax kaa yeelo inaad naftaada u baqdo ama xumaato isku dhaliso. Laga yaabaa inaadan badbaadsanayn haddii qof kuu xoog-sheeganayo, kugu qeylinayo, oo ku caynayo. Noocyada xadgudubyada qaarkood waxay noqon karaan qof kuu sheega waxaad sameyn karto ama aadan sameyn karin, ama qof kuugu hanjabo inuu adiga ama naftooda waxyello u geysan doono.

### Su'aalaha Badanaa La Is Weydiyo:

#### Miyaan wacaa booliska?

Haa. Rabshada qoyska waa dambi. Boolisku wuxuu adiga iyo carruurtaada geyn karaa guriga qoyskaaga ama saaxiibkaa ama meel badbaado leh sida hoyga haweenka. Haddii sarkaalka boolisku uusan ku hadlin luqaddaada, raadi qof aan ahayn ilmahaaga, seygaaga, ama saaxiibkaa si uu kuugu tarjumo. Markasta weydii sarkaalka booliska inuu buuxiyo "warbixin dhacdo," oo qeexaysa wixii dhacay.

#### Ma heli karaa amar ka ilaalin xitaa haddii aanan ahayn Muwaadin Mareykan ah?

Haa. Uma baahnid inaad ahaatid muwaadin ama degane sharci rasmi ah haysta si aad u hesho amar ka ilaalin. Wuxaad ka heli kartaa codsi guryaha maxkamadaha, hoyga haweenka, xafiisyada adeegyada sharciga, iyo waaxyaha booliska qaarkood.

#### Ninkayga ayaa ku hanjabaya inuu caruurtayda wadanayo hadaan isaga ka tago. Maxaan samayn karaa?

Haddii ninkaaga ama saaxiibkaa kuugu hanjabo inuu carruurtaada wadanayo ama u kaxeynayo waddankiisii hooyo, caawimaad hel adiga oo adeegsanayo tallaaboooyinka soo socda:

These materials have been approved by the Minnesota Center of Excellence in Newcomer Health.  
Thank you to the Colorado Department of Human Services for donating this material for adaptation and translation.



1. Soo qaado "amarka haynta" Amarku wuxuu ka joojin karaa ninkaaga ama saaxiibkaa inay carruurta ka kaxaystaan U.S.
2. U dir nuql amarka haynta Waaxda Arrimaha Dibedda ee Mareykanka si looga joojiyo inuu dal-ku-gal ama baasaboor u helo carruurta. Nuql u dir safaaradda Mareykanka ee dalka hooyo ee ninkaaga ama saaxiibkaa.
3. Nuql amarka ah sii dugsiyada carruurta. Shaqaalaha dugsiga u sheeg inaysan carruurta u daynin/siin cid aan adiga ahayn.

**Ma la i musaafurin doonaa haddii aan qaado mid ka mid ah tallaabooyinkan?**

Maya. Laguma masaafulin karo haddii aad ku soo dacwayso qof rabshad guri.

These materials have been approved by the Minnesota Center of Excellence in Newcomer Health.  
Thank you to the Colorado Department of Human Services for donating this material for adaptation and translation.

